

GOLAHA DEEGAANKA BRISTOL
(WADOOYIN KALA DUWAN, AAGGA VICTORIA AVENUE, EASTON, LAWRENCE HILL, ST. GEORGE CENTRAL, ST. GEORGE TROOPERS HILL AND ST. GEORGE WEST WARDS, MAGAALADA BRISTOL) (MAMNUUCIDA BAABUUR KU WADASHADA) (DARIIQ HAL-DHINAC
LOO MARO, BAASKIISHA KA HORTOGA JIHADA GAADIIDKU U SOCDO, HAADADKA BAASKIILKU RAACDO EE KA HORTAGA GAADIIDKA)
AMARKA 20-

Golaha Degaanka ee Bristol (halkan ka dib loogu yeedhi doono "Golaha") iyagoo adeegsanaya awoodahooda ku xusan qaybaha 1(1), 2(1) illaa (3) iyo Qaybta IV ee Jadwalka 9aad ee Xeerka Xakamaynta Isku-socodka Gaadiidka Wadooyinka 1984 qaybtiisa wax laga beddelay (halkan ka dib loogu yeedhi doono "Sharciga 1984") iyo dhammaan awoodaha kale ee ay leeyihiin, ka dib markii ay la tashadeen taliyaha ciidamada booliska taas oo waafaqsan Qaybta III ee Jadwalka 9aad ee Xeerka 1984, ayay halkan ku soo gudbinayaan amarkan soo socda:

Dhaqangalka iyo magaca

1. Amarkani wuu inuu dhaqangalaa waxa loogu yeedhi karaa Amarka Golaha Deegaanka Magaalada Bristol (Waddooyin kala duwan, Dariiq Aagga Victoria, Easton, Lawrence Hill, St. George Central, St. George Troopers Hill iyo St. George West Wards, ee Magaalada Bristol) (Mamnuucista Gaadhi ku Wadashda) (Baabuurta Hal Dhinac u Socota, Baaskiilayda ka hortagaysa Baabuurta socota iyo Haadka loogu talalgay Baaskiilayda Ka hortagaysa Jihada Baabuurta) Amarka 20--.

Fasiraad

2. (1) Amarkan:-

"**waddo laami ah**" waxaa loola jeedaa dariiq ka kooban laami wayn kaas oo ah dhabbo dadku u isticmaali karaan inay baabuurta ku wataan;

"**Sarkaal taraafii madani ah**" wuxuu leeyahay macnaha ku qoroan qaybta 76 ee Xeerka Maareynta Isku-socodka Gaadiidka ee 2004;

"**haadka baaskiilada**" waxaa loola jeedaa meelaha laamiga ee qorshayaasha ku calaamadiyeen "**Haadka baaskiilka ee baabuurta ka horta**";

"**aqoonsiga qofka naafada ah**" wuxuu leeyahay macno la mid ah midka ku qoran Xeer-nidaamiyaha Dadka Naafada ah (Aqoonsiyada Baabuurta) (Ingiriiska) ee 2000, qaybtiisa wax laga beddelay;

"**Gaariga qofka naafada ah**" waxaa loola jeedaa:

- (a) Gaadhi si sharci ah ugu muujinaya calaamada qofka naafada ah meesha ku habboon kaas oo isla markaas ama waxyar ka dib ama ka hor muddada sugitaanka ee amarkani jideeyay uu watay qof naaf ah, ama haddii kale lagu siday qof ama dad naaf ah oo rakaab ah; ama
- (b) gaari curyaanka lagu sheegay Qaybta 136 ee Xeerka 1984;

“qalab isgaarsiinta elektaroonika h” waxa loola jeedaa qalab ka kooban ama la rabo inuu ka koobnaado shebekad isgaarsiineed elektaroonik sida ku qeexan Xeerka Isgaarsiinta 2003;

"Sharci dejin" waxaa loola jeedaa sharci kasta ha ahaado mid guud ama mid maxalli ah oo ay ku jiraan amar, xeerhoosaad, sharci, xeer nidaamiye, qorsh sharciyeed, nidaam ama xeer kale oo ku dhaqangalaya marka la mariyo habka sharci dejinta.

"gaadhi" wuxuu leeyahay macnaha la mid ah ka ku qoran qaybta 136 ee Xeerka 1984;

"baaskiil lugeed" waxaa loola jeedaa baaskiil hal-luglay, baaskiil laba-lugay, saddex-lugey ama baaskiil leh afar iyo wax ka badan oo lugood, taas oo aan isticmaalin mishiin si ay u socoto illaa iyadoo ah baaskiil isticmaasha koronto oo aan loo isticmaalin gaari mator leh ahaan marka la eego Xeerka 1984;

"qorshe" waxaa loola jeedaa sawirrada ama khariiradaha ku lifaaqan halkan sida ku cad Jadwalka 1 ee amarkan;

“saarkaal bulsheed booliska kaaba” wuxuu leeyahay macno la mid ah midka ku qoran qaybta 38 ee Xeerka Wax-ka-baddalka Booliska 2002;

"Jid Dugsi (School Street)" waxaa loola jeedaa waddo baabuur wadista ka mamnuuc ah sida lagu tilmaamay Mamnuucidda baabuur ku wadashada (marka laga reebo dadka haysta ruqsadaha iyo kuwa haysta aqoonsiyada baabuurta ee dadka naafada ah) Isniinta-Jimcaha 8.30 - 9.15 subaxdii 3.10 - 3.50 galabtii taas oo ku qoran qorshayaasha/khariiradaha;

"Rukhsadda Jidadka Dugsiga” waxa loola jeedaa rukhsad kasta oo Golaha u soo saari si waafaqsan Xeerka 14aad ee amarkan;

"Haystaha Ruqsada Jidadka Dugsiga" waxaa loola jeedaa qofkii Ruqsadda Jidadka Dugsigu uu Golaha u siiya si waafaqsan shuruucda ku qoran Qodobka 14aad ee amarkan; iyo

"summad taraafiko" waxay leedahay macne la mid ah ka ku qoran qaybta 64 ee Xeerka 1984;

- (2) Sharci kasta oo lagu dhex xuso amarkan waa in loo fasirto sharcigaas oo isku dhan iyadoo la tixgeliyo wax ka baddal, dhaqangelin, midayn, dib u gudbin kasta oo sharciga lagu sameeyay ama iyadoo la fiirinayo saameynta sharciyada kale ee sharciga laga hadlayo gadaashiis la gudbiyay.

Mamnuucida baabuur ku wadashada

3. Marka laga reebo cidda ku cad Qodobka 10aad ee amarkan qofna waa in aanu gaadhi soo gelin ama ku wadan waddooyinka khariiradda loogu calaamadiyay “Baabuurta waa ka Mamnuuc” ama aanu ogolaan in cid kale sidaas sameyo.
4. Marka laga reebo sida ku cad qodobka 9-aad ama qodobka 10-aad ama qodobka 11-aad ee amarkan qofna, marka laga reebo inuu u tilmaamo ama ogolaansho siiyo sarkaal boolis ah oo dirays ku labisan ama sarkaal madani ah oo booliska taageer, ma soo gelin karo ama uma

oggolaan karo wax gaadhi ah, marka laga reebo baabuur wata Rukhsadda Jidadka Dugsiga oo ansax ah, ama gaariga qof naafo ah, inuu soo galo ama ku socdo inta u dhaxaysa saacadaha 8.30 subaxnimo iyo 9.15 subaxnimo iyo inta u dhaxaysa saacadaha 3.10 galabnimo iyo 3.50 galabnimo ee maalin kasta oo aan ka ahayn maalmaha Sabtida ama Axadd qaybaha waaddooyinka khariiradda loogu calaamadiyay “**Baabuurta waa ka Mamnuuc (marka laga reebo dadka haysta ruqsadaha iyo kuwa haysta aqoonsiyada baabuurta ee dadka naafada ah) Isniinta-Jimcaha 8.30 - 9.15 subaxdii 3.10 - 3.50 galabtii**” taas oo ku qoran qorshayaasha/khariiradaha;

Jidadka Hal-dhinac loo Maro

5. Marka laga reebo sida ku cad Qodobka 9aad ee amarkan, qofna waa inaanu gaari ugu waddan ama u ogolaan in lagu wato qayb waddo khariiradda loogu calaamadiyay “**In hal jihoo oo la Muujiyay loo marayo**” dhinac aan ahayn dhinacii lagu muujiyay jaantuska qaybtaas waddada ee khariiradda loogu calaamadiyay “**In hal jihoo oo la Muujiyay loo marayo**”, marka laga reebo isagoo qofkaas ogolaansho ama amar ka haysta sarkaal boolis ah oo labbisan ama saraakiisha bulshada ee booliska kaaba.

Waddo Hal-dhinac Baabuurta u Marto Baaskiiladu Dhinaca Kale

6. Marka laga reebo sida ku cad Qodobka 9aad ee amarkan, qofna waa inaanu gaari, aan ka ahayn baaskiil baytaleey ah, ugu waddan ama u ogolaan in lagu wato qayb waddo khariiradda loogu calaamadiyay “**In hal jihoo oo la Muujiyay loo marayo (marka laga reebo baaskiiladaha)**” dhinac aan ahayn dhinacii lagu muujiyay jaantuska qaybtaas waddada ee khariiradda loogu calaamadiyay **In hal jihoo oo la Muujiyay loo marayo (marka laga reebo baaskiiladaha)**”, marka laga reebo isagoo qofkaas ogolaansho ama amar ka haysta sarkaal boolis ah oo labbisan ama saraakiisha bulshada ee booliska kaaba.

Haad Baaskiishu u Marto Dhinaca Baabuurta ka soo Socoto

7. Marka laga reebo sida ku cad Qodobka 9aad iyo Qodobka 12aad ee amarkan qofna waa inaanu gaari, aan ka ahayn baaskiil baytaleey ah
 - (a) ku sii galin ama ku wadan ama aanu ogolaan in cid kale ku wadato ama ku soo gasho haadka baaskiilka aan ka ahayn iyadoo laga gudbayo maahane, marka laga reebo isagoo qofkaas ogolaansho ama amar ka haysta sarkaal boolis ah oo labbisan ama saraakiisha bulshada ee booliska kaaba; ama
 - (b) istaagin ama aanu ogolaan in cid kale istaagto haadka baaskiilka aan ka ahayn iyadoo laga gudbayo maahane, marka laga reebo isagoo qofkaas ogolaansho ama amar ka haysta sarkaal boolis ah oo labbisan ama saraakiisha bulshada ee booliska kaaba.
8. Marka laga reebo sida ku cad Qodobka 9aad iyo Qodobka 12aad ee amarkan qofna, marka laga reebo isagoo qofkaas ogolaansho ama amar ka haysta sarkaal boolis ah oo labbisan ama saraakiisha bulshada ee booliska kaaba, waa in aanu baaskiil ugu wadan ama u ogolaan in qof kale ugu kaxaysto jiho aan ka ahayn ta lagu muujiyay haadka baaskiisha ee qorshayaasha loogu muujiyay “**Haad Baaskiishu u Marto Dhinaca Baabuurta ka soo Socoto**”.

Ka dhaafitaano

9. Ma jiro wax (xannibaadyo iyo mamnuucidba) oo ku xusan qodobka 3-aad ama qodobka 4-aad ama qodobka 5-aad ama qodobka 6-aad ama qodobka 7-aad ama qodobka 8-aad ee amarkan oo loo adeegsan karo gaadhi kasta oo loo isticmaalo adeega dabka iyo samatabbixinta, ambalaasta

ama ujeedooyin boolis oo degdeg ah.

10. Waxyaabaha ku xusan Qodobka 3 iyo Qodobka 4 ee amarkan laguma dabbaqayo baaskiil kasta oo baytaleey ah.

11. Ma jiraan wax ku qoran qodobka 4aad oo qofna sharciyan ka hor istaagaya inuu gaari ku soo galo oo uu ku wato ama u ogolaado qofkale inuu ku soo galo oo ku wato qaybaha waddada ee qodobkaas lagu xusay haddii gaari loo isticmaalayo ujeedo muhiim ah oo aan ka suurtagal ahayn wax waddo kale ah, isticmaalkaas oo:-

- (a) oo la xidhiidha hawlgallada soo socda ee laga qabanayo ee qaybtaas waddada ee la xusay, sida:-
 - (i) halgalada dhismaha, warshadaha, duminta ama qodaalka;
 - (ii) saarista wax kasta oo xannibaya isku socodka gaadiidka;
 - (iii) dayactirka, hagaajinta ama dib u dhiska ka socda qaybta waddada la xusaay ama hareeraha waddadaas;
 - (iv) dhigista, taagista, wax ka badalista ama dayactirka ka dhex socda ama laga wado dhulka ku xiga qaybta waddada ee la xusay kuwaas oo lagu wado bullaacadaha ama xadhkaha, tuubooyinka ama qalabka loogu talagalay bixinta gaasta, biyaha ama koronta ama qalabyada elektaroonika ah ee loogu talagalay isgaarsiinta sida ku cad xeerka Isgaarsiinta 2003; ama
 - (v) dhismaha, rakibidda, hagaajinta, dayactirka, horumarinta ama nadiifinta wixi calaamadaha waddada ah, kaabayaasha istaanka basaska ama qalabyada kale ee loogu talagalay dariiqa ama shaygii kale ee sifo sharci ah qaybta waddada ama dacalkeed loogu rakibay ama loogu rakibayo;
- (b) gaariga loo adeegsanayo hawlaha dowladda hoose, Hay'adda Deegaanka, shaqaalaha biyaha ama bullaacadaha oo qabsanaya waajibkooda sharciyeed; ama
- (c) si ay u galaan goobo ku dhinac yaalla qaybaha waddooyinka ee la xusay haddii gaarigaas ay si macquul ah muhiim ugu tahay inuu tago goobahaas sababo aroos ama tacsiiyeed dartood.

12. (1) Ma jiraan wax ku qoran qodobka 7aad ama Qodobka 8aad oo qofna sharciyan ka hor istaagaya inuu

soo galo oo ugu socdo dhinac kasta ama u ogolaado qof kale inuu soo galo haadka baaskiiladaha illaa iyo inta gelitaankan ama ku socoshadani ay muhiim ugu tahay gaadhiga si loogu adeegsado mid kasta oo ka mid ah ujeedooyinkaas lagu xusay farqadda (2) ee Qodobkan ama inuu istaago haadka baaskiisha illaa iyo inta lagama maarmaanka u ah mid kasta oo ujeedooyinkaas ka mid ah.

(2) Ujeedooyinka lagu sheegay farqadda (1) ee qodobkan waa:

- (a) saarista wax kasta oo xannibaya isku socodka gaadiidka ee haadka baaskiisha;
- (b) adeegyada dowladda hoose ama wakaaladda biyaha oo gudanay

waajibaadkooda sharciyeed ama hawlo la xidhiidha bixinta gaasta ama koronta ama qalabyada elektaroonika ah ee loogu talagalay isgaarsiinta sida ku cad xeerka Isgaarsiinta 2003;

- (c) gaari ama baaskiil shil iska ilaalinaysa;
- (d) gaari gelinta ama ka soo saarista goobaha ku dhejisan ama laga soo geli karo keliya haadka baaskiisha iyadoo ujeedadu tahay in alaabo lagu rogo ama geerash gayn; iyo
- (e) dhaafista gaadhi taaggan qayb laamiga ah oo ku dheggan haadka baaskiilada iyadoo aanay baannaanayn meel aan ka ahayn haadka baaskiilada oo laga dhaafi karo gaadhiga.

Shuruudo waa in marka sababahan dartood loo gelayo haadka baaskiisha aanu qof baaskiil wata marayn haadkaas baaskiisha.

13. Golahu wuxu ku qancay inay muhiim tahay in qaybta 3(1) ee Xeerka 1984 aan la dhaqangelin sababahan soo socda dartood:
- (a) ka ilaalinta khatar dad ama gaadiid kale oo isticmaalaya waddada amarku ka hadlayo ama waddo kasta oo kale, ama
 - (b) ka hortaga suurtagalnimada in khatar kasta oo noocan ahi dhacdo.

Rukhsadda Jidadka Dugsiga

14. Golaha wuxu bixin karaa rukhsad Jidadka Dugsiga lagu isticmaali karo:-
- (a) iyadoo loo eegayo xadidaadyada Golahu soo ku soo rogi karo mid kasta oo ka mid ah arrimahan soo socda, sida:-
 - (i) muddada rukhsaddu shaqaynayso;
 - (ii) dhererka wadooyinka rukhsadda loo adeegsan karo; iyo
 - (iii) aqoonsiga ama nooca gaadhiga loo ogolaaday inuu soo galo ama ku socdo qaybta wadooyinka iyadoo lagu tixgeliyayo rukhsadda la siiyay;
 - (b) iyadoo loo eegayo shuruud (haddii Golahu sidaas go'aamiyo) in qofka haysta Rukhsadda Jidadka Dugsiga uu soo saaro rukhsadda iyo/ama aqoonsiga kale ee dheeraadka ah ee uu Golahu waajibiyay kuna soo bandhigo meel muuqata oo gaariga korkiisa ama gudihisa ah taas oo ay si waadax ah ugaga muuqanayso sarkaalka booliska ah xilliga gaarigu soo galayo ama raacayo qaybaha wadooyinka xayiran; iyo
 - (c) iyadoo loo eegayo shuruudo ama xaddidaadyo kale (ha noqdaan kuwo ka dheeri ah, ka duwan ama beddel u ah kuwa hore ama yaanay noqone) kuwaas oo Golahu go'aamin karo laguna cayimi doono barta rukhsadda laga codsaday.
15. Qodobka 4aad ee amarkan wuxu dhabaqmayaa keliya waqtiyada loogu baahdo maalmaha dugsiga Redfield Educate shaqaynayo iyo illaa heerka ay tilmaamayaan calaamadaha

waddooyinka ee ku cad Xeerka Calaamadaha Waddooyinka iyo Shuruucda Guud ee Gaadiidka 2016 hadba sidii wax looga beddelo.

Beddelaadda iyo La Laabasha Amarada

16. Golaha Magaalada ee Bristol (Wadooyin kala duwan, A420 Church Road Area, Easton, Lawrence Hill, St. George East iyo St. George West, Magaalada Bristol) (Aaga Bari-Bartamaha iyo Bari) (Xeerka Gaadiidka Guud) Amarka 2007, nooca ay wax ka baddaleen Golaha Magaalada Bristol (Wadooyin kala duwan, Aagga West Street A420, Lawrence Hill, Magaalada Bristol) (Aagga Bartamaha Bari) (Goobaha Wax Lagu Rarto) (Goobaha Baaskiisha la Dhigoto) (Mamnuucida iyo Xayiraadda Sugitaanka) Amarka 2007, Golaha Magaalada ee Bristol (Kennard Road iyo Kingsway Crescent, St. George East, Magaalada Bristol) (Aagga Bari) (Mamnuucida Sugitaanka) Amarka 2008, Golaha Magaalada Bristol (Wadooyinka River Street iyo Wadooyinka Aan La Magacaabin ee ka baxsan Aagga St. Matthias Park, Lawrence Hill , Magaalada Bristol) (Gudaha, Waqooyiga Bartamaha iyo Aagaga Dibadda) (Mamnuucidda Sugitaanka - Aagga xaddidan) Amarka 2009, Golaha Magaalada ee Bristol (Aagga dibadda, Magaalada Bristol) (Gaadhi Dhigasho Xakamaysan) (Ka duwanaanshaha No. 3 - Kordhinta) Amarka 2009, Golaha Magaalada ee Bristol (Wadooyin kala duwan, Magaalada oo dhan, Magaalada Bristol) (Mamnuucida Joogsashada Dugsiga Dibadiisa) Amarka 2009 (Mamnuucida Sugitaanka) Amarka 2009, Golaha Magaalada ee Bristol (Wadooyin kala duwan, A420 Church Road Area, Easton, Lawrence Hill, St. George East iyo St. George West, Magaalada Bristol) (Aaga Bari-Bartamaha iyo Bari) (Xeerka Gaadiidka Guud) (No. 1 - Air Balloon Road) Amarka 2011, Golaha Magaalada ee Bristol (Wadooyin kala duwan , A432 Fishponds Road iyo A432 Stapleton Road Area, Easton, Eastville, Frome Vale iyo Lawrence Hill, Magaalada Bristol) (Aagaga Bari iyo Bariga Bartamaha) (Sharciga Gaadiidka Guud) Amarka 2011, Golaha Magaalada ee Bristol (Pilemarsh iyo Terrell Gardens, St. George West, Magaalada Bristol) (Aagga Bari) (Baabuur Haldhinac u socota iyo Baaskiilada oo ka hortagay) (Mamnuucida Sugitaanka) Amarka 2012, Golaha Magaalada ee Bristol (Baabuurta La wadaago, Magaalada oo dhan, Magaalada Bristol) (Goobaha Baakinka Waddada Korkeeda) Amarka 2012, Golaha Magaalada ee Bristol (Wadooyin kala duwan, Aagga Kingsway, St. George East iyo St. George West, Magaalada Bristol) (Aaga Bari) (Mamnuucida iyo Xayiraadda Sugitaanka) (Mamnuucida Joogsashada) (Goobaha Baabuur Rarista) Amarka 2012, Golaha Magaalada Bristol (Wadooyin kala duwan, Clouds Hill Road iyo Plummers Hill Area, St. George West, City of Bristol) (Aaga Bari) (Mamnuucida iyo Xakamaynta Sugitaanka) (Mamnuucida Joogsashada) (Goobaha Baakinka Dadka Naafada ah) Amarka 2014, Golaha Magaalada ee Bristol (Aagga Easton iyo St. Philips, Ashley iyo Lawrence Hill, Magaalada Bristol) (Aagaga Bariga Bartamaha iyo Waqooyiga Bartamaha) (Dhulka Baarkinka Dadka Degaanka) (Mamnuucidda Joogsashada) Amarka 2014 , Golaha Magaalada ee Bristol (Wadooyin kala duwan, Aagga Victoria Avenue, Easton iyo St. George West Wards, Magaalada Bristol) (Mamnuucida iyo Xayiraadda Sugitaanka) (Goobta Baabuurta wax looga raro) Amarka 2014, Golaha Magaalada Bristol (Wadooyin kala duwan, St. Aagga Philips, Lawrence Hill, Magaalada Bristol) (Aagga Bartamaha Bari) (Mamnuucida iyo

Xayiraadda Sugitaanka) Amarka 2014, Golaha Magaalada ee Bristol (Wadooyin kala duwan, Aagga Whitehall Road, Easton iyo St. George West Wards, Magaalada Bristol) (Mamnuucida iyo Xayiraadda Sugitaanka) (Mamnuucidda Gaari ku wadashada) 2015, Golaha Magaalada ee Bristol (Wadooyin kala duwan, Redfield North Area, Easton iyo St. George West Wards, Magaalada Bristol) (Mamnuucida iyo Xayiraadda Sugitaanka) (Meelaha Baakinka Baabuurta Wadaagga ah) Amarka 2016, Golaha Magaalada ee Bristol (Waddooyin kala duwan, Aagga Waddada Croydon, Lawrence Hill Ward, Magaalada Bristol) (Mamnuucida iyo Xayiraadda

Sugitaanka) Amarka 2016, Golaha Magaalada ee Bristol (Wadooyinka kala duwan, Beaconsfield Road Area, St. George West Ward, Magaalada Bristol) (Mamnuucida Sugitaanka) Amarka 2019, Golaha Magaalada ee Bristol (Wadooyin kala duwan, Aagga Easton, Easton, Eastville iyo Lawrence Hill Wards, Magaalada Bristol) (Mamnuucida iyo Xayiraadda Sugitaanka) (Mamnuucidda Joogsashada) (Goobaha Baabuurta Laga Raro) (Goobaha Baabuurta Wadaaga ah la Dhigto) (Goobaha Baarkinka Dadka Naafada ah) Amarka 2019, Golaha Magaalada ee Bristol (Ducie Road iyo Morton Street, Lawrence Hill Ward, Magaalada Bristol) (Mamnuucida iyo Xakamaynta Sugitaanka) Amarka 2019 iyo Golaha Magaalada Bristol (Wadooyin kala duwan, A420 Church Road Area, Easton, Lawrence Hill, St. George East iyo St. George West, Magaalada Bristol) (Aaga Bariga Bartamaha iyo Bari) (Sharciga Gaadiidka Guud) (Nooca/isbeddelka 2 - Grindell Road) Amarka 2022 isbeddel ayaa lagu sameeyay kaas oo saameynaya waxyaabaha ku qoran Jadwalka 24 ee la xiriira dariiqyada **BARNES STREET, BYRON STREET, COSSHAM ROAD, DUCIE ROAD, GRINDELL ROAD, LEONARD ROAD, MORSE ROAD, NORTHCOTE ROAD, PILEMARSH, RICHMOND ROAD, SALISBURY ROAD, SENECA STREET, VERRIER ROAD, WEIGHT ROAD, WICKET LANE, WITCHELL ROAD, WORSLEY STREET** kuwaas oo laga dhaafay qodobada kor jadwalka kor lagu xusay.

17. Amarada lagu sheegay Jadwalka 2 ee amarkan halkan ayaa lagu buriyay.
18. Qodobbada amarkan waa kordhin iyo kaabis uun oo ma nasakhayaan qodob kasta oo lagu xusay shuruuc kale ama laga yaabo inay ku jiraan Xeerka 1984 ama sharci kale oo dhaqangalay.

Shaabadda Guud ee Golaha Degaanka Bristol ayaa lagu dhuftay maalinta

SHAABADDA GUUD ee

GOLAHA DEGAANKA MAGAALADA BRISTOL ayaa lagu ansixiyay iyadoo uu goob joog yahay:-

Agaasimaha Adeegyada Sharciga iyo Dimuqraadiyadda

JADWALKA 1
Qorshayaasha

RS21031 - EBLN - 00

RS21031 - EBLN - 01

RS21031 - EBLN - 02

RS21031 - EBLN - 03

JADWALKA 2
Amarada laga laabanayo

1. Magaalada iyo Gobolka Bristol (Beam Street iyo Mildred Street, Barton Hill) (Jid Hal Dhinac Loo Marayo) Amarka 1967 sida ay Maagalada iyo Degmada Bristol u beddeleen (Beam Street iyo Mildred Street, Barton Hill) (Jid Hal Dhinac Loo Marayo) (Nooca Lr. 1) Amarka 2006
2. Magaalada iyo Gobolka Bristol (Queens Road, St. George) (Waddo Gaadiidku Hal-dhinac u maraan) Amarka 1968
3. Golaha Deegaanka ee Avon (Cobden Street, Netham Road iyo Victoria Avenue, Redfield, Magaalada Bristol) (Aagga Bariga) Waddo Gaadiidku Hal-dhinac u maraan iyo Haad Baaskiil) Amarka 1993
4. Golaha Degaanka ee Bristol (Wadada Cobden Street, Easton iyo Lawrence Hill, Magaalada Bristol) (Aagga Bariga) (Waddo Gaadiidku Hal-dhinac u maraan iyo Haad Baaskiil) (Mamnuucista Sugitaanka) Amarka 2000
5. Golaha Degaanka ee Bristol (Victoria Avenue, Easton Ward, Magaalada Bristol) (Baabuur Ka Mamnuucista Jidka Dugsiga) (Waddo Gaadiidku Hal Dhinaca U Maraan) Amarka 2022